جمهورية مصر العربية                    30 ربيع الأول 1443هـ
وزارة الأوقاف                    5 نوفمبر 2021م

(1)

# Macnaha cibaadada

Mahad Allaa iska leh , Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{إِنَّ اللَّهَ رَبِّي وَرَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ هَذَا صِرَاطٌ مُّسْتَقِيمٌ}،

**(Ilaahay waa Eebahay iyo Eebihiin ee caabuda, kaasaa ah jidka toosane.)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame
intaas kaddib.

Cibaadada boos wen ayay taagan tahay iyo darajo sarreysa, waa yoolka ugu weyn oo Ilaahay (Caza wajalla) khalqiga u abuuray, wuxuu leeyahay (SW):

{وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالْإِنْسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونِ}،

**(Jinni iyo Insi waxaan Cibaadadayda ahayn uma abuurin.)**

Wuxuu kaloo leeyahay (SW):

{وَمَـا أَرْسَـلْنَا مِـن قَبْلِـكَ مِـن رَّسُـولٍ إِلا نُـوحِي إِلَيْـهِ أَنَّـهُ لا إِلَـهَ إِلا أَنَـا فَاعْبُدُونِ}

**(Rasuulkaan hortaa dirnayba waxaan u waxyoonay ilaah aan Ani ahayn ma jiro ee i caabuda.)**

Cibaadada waa shaqada aadanaha noloshiisa oo dhan wuxuu leeyahay Xasan Albasri (Ilaahay ha u naxariistee): Ilaahay uma yeelin camalka mu’minka ajal geeri aan ahayn.

Qofka fiirfiiriya shareecada islaamka wuxuu arkayaa mafhuumka cibaadada inuu labo macne leeyahay, kan koowaad: waa macne guud oo ballaaran waxaa soo galaya khayrka oo dhan, sida raadinta risqiga iyo dabciga fiican iyo hadalka runta, iska cafinta qofka qaldan, heshiisinta dadka, waxsiinta reerka iyo qaybaha kale ka mid ah samaflka, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{لَا خَيْرَ فِى كَثِيرٍ مِّن نَّجْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ ٱلنَّاسِ وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ ٱبْتِغَاءَ مَرْضَاتِ ٱللَّهِ فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا}،**

**(Khayr ma leh wax badan oo faqooda ah, oon ahayn mid fara sadaqo ama wanaag ama hagaajin dadka dhexdooda, ruuxii fala saas asoo doonayo raalli ahaanshaha Alle waxaanu siin ajir weyn)**

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كُلُّ سُلامَى مِنَ النَّاسِ عَلَيْهِ صَدقةٌ كلَّ يومٍ تطلُعُ فيه الشَّمسُ، يعدِلُ بين الاثنَين صدقَة، ويُعينُ الرجُلَ على دابَّته فيحمِلُ عليها، أو يرفعُ عليها**

**متاعَه صدقَة، والكلمةُ الطيبةُ صدقَة، وكلُّ خُطوةٍ يخطُوها إلَى الصَّلاةِ صَدَقَة، ويُميطُ الأذَى عَنِ الطَّرِيقِ صَدَقَة).**

**(xubin kaste dadka ka tirsan sadaqo ayaa laga rabaa, maalin kaste ay qorraxda soo baxayso, labo qof aad kala garsoorayso waa sadaqo, qofka aad ugu kaalmaynayso gaadiidkiisa oo aad alaabta u qaadayso ama aad u dhiibayso alaabtiisa waa sadaqo, hadalka fiican waa sadaqo, talaabo kaste aad u qaadayso salaadda waa sadaqo, jidka dhibka uu ka leexinayo qofka waa sadaqo)**

Sidoo kale camiraadda dhulka iyadoo loo soo maro beeridda iyo farsamada iyo sugidda shaqada taasoo waxtarkeeda kusoo laabanaya bulshada oo dhan, sababna u noqonaysa sarreynta dalka iyo hormarkiisa, waxay ka mid tahay cibaadaadka Ilaahay (Caza wajalla) uu jecel yahay waana waxa Alle uu ka rabo aadanaha wuxuu leeyahay Alle:

**{ هُوَ أَنْشَأَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا }،**

**(Isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa)**

Nabigeena wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(أَحَبُّ النَّاسِ إلى اللهِ أنفعُهم للناسِ، وأَحَبُّ الأعمالِ إلى اللهِ (عزَّ وجلَّ) سرورٌ تُدخِلُه على مسلمٍ، تَكشِفُ عنه كُربةً، أو تقضِي عنه دَيْنًا، أو تطرُدُ عنه جوعًا، ولأَنْ أمشيَ مع أخٍ في حاجةٍ؛ أَحَبُّ إليَّ مِنْ أَنْ أَعْتَكِفَ فِي هَذَا المَسْجِدِ- يَعْنِي: مَسْجِدَ المَدِينَةِ- شَهْرًا، وَمَنْ كَظَمَ غَيْظَهُ وَلَوْ شَاءَ أَنْ يُمْضِيَه أَمْضَاهُ؛ مَلأَ اللهُ قَلْبَهُ يَوْمَ القِيَامَةِ رِضًا، وَمَن مَشَى مَعَ أَخِيهِ فِي حَاجَةٍ حَتَّى يَقضِيَها لَهُ؛ ثَبَّتَ اللهُ قَدمَيْهِ يَوْمَ تَزُولُ الأَقْدَامُ).**

**(Dadka waxaa loogu jecel yahay xagga Alle kuwa ugu dadka anafac badan, camalna waxaa loogu jecel yahay Alle agtii qof muslin aad farxad galinayso, ama aad kurbo ka feydayso, ama aad deyn ka gudayso, ama aad gaajo ka eryinayso, inaan ula socdo walaalkayga dantiisa ayaa loogu jecel yahay inaan masjidkan bil ku ictikaafo – wuxuu ka wadaa masjidka Madiina-, qofkii caradiisa celiyo Alle ayaa cawradiisa asturaya qofkii cabburiyo ciilkiisa hadduu rabi lahaa inuu fuliyo fulin karo Alle ayaa ka buuxinaya xabadkiisa amni maalinta qiyaame, qofkii ula socdo walaalkiisa dan ilaa uu u xasiliyo Alle ayaa ku sugaya cagtiisa siraadka maalinta ay ku sanbariiraxdaan cagaha)**

Kan labaadna waa mid gaar ah oo cibaadada si gaar loogu sifeeyo, waxaa soo galaya oogidda dhamaan shacaacirta islaamka iyo gudashada arkaantiisa, oo ka mid ah salaadda, sakada, soonka, xajka,

wxuu leeyaya Alle (SW):

**{ حَافِظُوا عَلَى الصَّلَوَاتِ وَالصَّلَاةِ الْوُسْطَى وَقُومُوا لِلَّـهِ قَانِتِينَ }**

(**xifdiya (ilaaliya) Salaadaha iyo Salaadda dhexe (sharafta badan) (Carsaka) una istaaga dar Eebe idinkoo adeeci, (khushuuci).)**

wuxuu leeyahay Alle:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ}**

**(Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay Soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan)**

wuxuu leeyahay Alle:

**{وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَمَا تُقَدِّمُوا لِأَنْفُسِكُمْ مِنْ خَيْرٍ تَجِدُوهُ عِنْدَ اللَّهِ}**

**(Salaaddana ooga sakadana bixiya waxaad u hormarsataan Naftiina oo khayr ah waxaad ka helaysaan Eebe agtiisa)**

wuxuu leeyahay Alle:

**{وَلِلَّهِ عَلَى النَّاسِ حِجُّ الْبَيْتِ مَنِ اسْتَطَاعَ إِلَيْهِ سَبِيلًا وَمَنْ كَفَرَ فَإِنَّ الله غَنِيٌّ عَنِ الْعَالَمِينَ}.**

**(Eebana wuxuu ku leeyahay Dadka Xajka Baydka Ruuxii kara Wadada, Ruuxii Gaaloobana Eebe waa ka kaaftoonyahay Caalamka.)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Waxaan sugaynaa shakhsiyadda toosan waa midda isu barbardhigta gudashada waajibaadka Alle (caza wa jalla) salaad iyo soon iyo xajka faradka qofkii awoodo taas, iyo camiridda koonka iyo ku dhaqanka akhlaaqda suuban.
Sidoo kale waxaan adkaynaynaa cibaadooyinka gaarka lagama faa'ido haddaysan wadanin akhlaaqda aadanaha iyo dhaqankiisa, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{إِنَّ الصَّلاةَ تَنْهَى عَنِ الفَحْشَاءِ وَالمُنْكَرِ}**

**(Salaaddu waxay ka reebta (Dadka) Xumaanta iyo waxa la noco)**

wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):
**(إِذَا كَانَ يَوْمُ صَوْمِ أَحَدِكُمْ فَلَا يَرْفُثْ يَوْمَئِذٍ وَلَا يَصْخَبْ، فَإِنْ شَاتَمَهُ أَحَدٌ أَوْ قَاتَلَهُ فَلْيَقُلْ: إِنِّي امْرُؤٌ صَائِمٌ)،**

**(haddii midkiina uu sooman yahay yuuna afxumo ku dhaqaaqin yuuna qaylinin haddii qof caayo ama la dagaallamo ha yiraahdo: waxaan ahay qof sooman)**

wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّمَا بُعِثْتُ لأُتَمِّمَ مَكَارِمَ الأَخْلاقِ)**

**(Waxaa laysoo diray inaan dhammeystiro akhlaaqda suuban)**

qofkii kaa badiyo akhlaaqda waa kaa badinayaa diinta saxa ah.

**Ilaahayow noogu kaalmeey xuskaaga iyo mahdintaada iyo cibaadadaada suuban**